

Ka Ilaalinta Ilmahaaga Jadeecada

SOMALI TRANSCRIPT

Si fudud ayaad ilmahaaga ooga ilaalin kartaa jadeecada adiga oo adeegsanaya tallaalka MMR. Jadeecadu waa cudur halis ah oo ilmaha aad ugu jirran karo. Carruurta yaryari waxay halis ugu jiraan inay xanuunsadaan, waxaana laga yaabaa inay isbitaalka u aadaan dhibaatooyinka jadeecada sida fuuq-baxa, caabuqa sambabada, qandho badan, caabuqa dhagaha iyo qaar kaloo badan.

Jadeecada waxaa looga hortagi karaa tallaalka MMR ee loo isticmaalo qaamo-qashiirta iyo jadeecada. Tallaalka jadeecada waa mid si dhamaystiran loo tijaabiyay oo in ka badan 50 sano ayaa si badqab leh dunida looga isticmaalayay. Waa habka ugu fiican ee aan haysano si wacan ayuuna ooga hortagaa cudurka jadeecada.

Waxaa lagula taliyay caruurta jirta 1 sano inay qaataan qiyaasta koowaad ee tallaalka MMR, sidoo kalana waa inay tallaalkan qaataan markay da'doodu gaadho inta u dhaxaysa 4 iyo 6 sano ka hor intaysan iskuulka bilaabin. Ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa inuu guriga joogo oo uusan aadin xarumaha daryeelka caruurta, iskuulka, iyo hawlaha kale muddo dhan 21 maalmood, waa haddii uusan qaadan tallaalka MMR jadeecaduna gaartay.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama walaac, waydii dhaqtarkaaga! Rugtaada caafimaadka ayaad ka heli kartaa tallaalka MMR. Dhaqtarkaaga ayaa kuu sheegi doona waxaad filan karto tallaalka kadib, oo ku siin doona warqad lagu magacaabo Xaashida Macluumaadka Tallaalka, waxayna la socotaa xogtan.

Hubi in carruurtaadu tallaalan yihiin, oo dhammaanteen waxaan ka wada shaqeyn karnaa sidii aan u ilaalin laheyn caafimaadkeena. Carruurta waxay halis ugu jiraan jadeeco ilaa laga tallaalayo.

Minnesota Department of Health
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
www.health.state.mn.us/immunize

06/12/2025

To obtain this information in a different format, call: 651-201-5414.